

# Isdiiwaangalinta Cod-bixinta Saint Paul

Magaalada Saint Paul waxay uga baahan tahay mulkiilahaaga inuu bixiyo macluumaad ku saabsan diiwaangelinta codbixinta. Doorashada inaad isdiiwaangeliso oo aad codka dhiibato adiga ayay kuu taalaa. Haddii aad jeclaan lahayd inaad iska diiwaangeliso cinwaankaaga cusub, fiiri doorashooyinka hoose ku xusan.



## Iska diiwaangali internetka.


Buuxi codsiga internetka ah ee tag [mnvotes.org](https://mnvotes.org).



## Is diiwaangali warqad ahaan.

Eeg codsiyada ku qoran luuqado badan at [mnvotes.org](https://mnvotes.org). Daabaco ka dibna boostada ku soo dir:

Ramsey County Elections  
PO Box 64098  
Saint Paul, MN 55164



## Is diiwaangali shakhsi ahaan.

Iska diiwaangali goobtaada codbixinta Maalinta Doorashada. Fiiri macluumaadka dukumentiyada aad u baahan tahay inaad keento ee ku qoran dhinaca dambe ee warqadan.

## *Waxaad xaq u leedahay inaad ka codeyso Minnesota haddii:*

- ✓ Aad jirtid ugu yaraan 18 sano ama ay kuu buuxsanto ka hor maalinta doorashada.
- ✓ Aad tahay muwaadin Maraykan ah.
- ✓ Aad degganayd Minnesota ugu yaraan 20 maalmood.
- ✓ Aadan ku jirin xabsi xukun ciqaab ama dembi-baaris dambiile ah / sii-dayn shuruudo leh.
- ✓ Aadan ku jirin ilaalin sharciyeed taasoo kaa joojinaysa xaqaaga cod bixinta.

Si aad isu diiwaan geliso Maalinta Doorashada, waxaad u baahan doontaa inaad keento caddeyn. Fiiri bogga gadaale wixii doorashooyin ah.

# Dooro *hal* mid ka mid ah doorashooyinka soo socda si aad isu diiwaan geliso Maalinta Doorashada.

## **Aqoonsi leh magac iyo cinwaan hadda jira**

- › Ruqsadda darawalnimada ee Minnesota, midka tababarka darawalnimada, ama aqoonsiga MN; ama rasiidka mid ka mid ah kuwan.
- › Aqoonsi qabiil oo leh magac, cinwaan, sawir, iyo saxiix.

## **AMA**

## **Aqoonsi sawir IYO dukumeenti leh magacaaga iyo cinwaankaaga hadda**

### *Aqoonsiyada sawirka leh ee la ogolyahay*

- › Ruqsadda darawalnimada, aqoonsiga gobolka ama midka tababarka darawalnimada ee uu bixiyo gobol kasta
- › Baasaboorka Mareykanka, aqoonsiga militariga Mareykanka ama aqoonsiga dadka militariga ka baxay
- › Aqoonsi qabiil oo leh magac, saxiix iyo sawir
- › Aqoonsiga jaamacadda, aqoonsiga kolleejada ama kolleejada xirfadda ee Minnesota
- › Aqoonsiga dugsigaa sare ee Minnesota

### *Dukumeentiyada la ogolyahay*

- › Biil, qoraalka akwanka ama mid adeegga bilaabanaya taariikhda ku qoran 30 cisho gudahood ee maalinta doorashada: telefoon, telefihin, ama internetka; qashinka adag, bulaacad, koronto, gaas ama biyo; bangiga ama kaarka deynta;
- › kirada ama mortgage-ka; heshiis ijaareed ama heshiiska ijaarka oo jiraya illaa iyo Maalinta Doorashada
- › Bayaanka lacag-bixinta ardayga ee hadda jira

## **AMA**

## **Ma haysid mid ka mid ah kuwa kor ku xusan? Mid ka mid ah xulashooyinka soo socda ayaa shaqayn kara.**

- › Codbixiye diiwaangashan ee xaafaddaada ayaa xaqiijin kara cinwaankaaga.
- › Aqoonsi Ardaynimo Kolleejo OO LEH liiska guryaha oo ay kolleejadaada u xaqiijisey Degmada Ramsey.
- › Diiwaangelin hore ee ku taala isla goobta, taasoo cinwaankeedu uu ka duwan yahay ama ku qoran magac kale.
- › Ogaysiiska diiwaan gelin daahday ee ay kuu soo dirtay Degmada Ramsey.
- › Qofka shaqaalaha ka ah xarun hoy ee aad ku nooshahay, sida hoyga shelterka.

Booqo [rcelections.org](http://rcelections.org) ama wac 651-266-2171 wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan diiwaangelinta iyo cod bixinta.